JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE

XAFIISKA IMTIXAANAADKA QARANKA

S A A B K A I M T I X A A N A A D K A

TIIRAKA GUNDHIGGA U AH NIDAAMKA IMTIXAANAADKA

DECEMBER 1, 2021

XAFIISKA IMTIXAANAADKA QARANKA
MUQDISHO, SOOMAALIYA

Tusmo

Mahadcelin 3
Erey Bixin 4
Hordhac 5
1. Cutubka 1aad: Ujeeddooyin Guud 6
1.1. Ujeeddada Saabkaan Guud 6
1.2. Baahida Keentay Saabkan 6
1.3. Diyaarinta Saabkan 6
1.4. Hiigsi 7
1.5. Himilo 7
1.6. Qiyam 7
1.7. Mabaadi' Guud 7
1.8. Sharcinimada Sameynta Saabka 7
1.9. Saamayn 8
1.10. U-Dhammaan 8
2. Cutubka 2aad: Tabaabusheysiga/Taabba-gelinta Imtixaanaadka 9
2.1. Ammaano iyo Hufnaan 9
2.2. Miisaaniyadda Imtixaanaadka 9
2.3. Qiimayn aqoonta ardayga 9
2.4. Diiwaangelinta ardayda 9
2.5. Xarun Imtixaan 9
2.6. Jadwallada Madalaysan 10
3. Cutubka 3aad: Maamulidda & Qaadista Imtixaanaadka 11
3.1. Amniga Imtixaanaadka 11
3.2. Dejinta Imtixaanka 11
3.3. Daabicidda Imtixaanka 11
3.4. Keydinta Imtixaanaadka 11
3.5. Daabulista Imtixaanaadka 11
3.6. Qaadista Imtixaanka 11
3.7. Anshaxa Imtixaanaadka 12
4. Cutubka 4aad: Sixidda Imtixaanaadka 13
4.1. Sixidda Imtixaanaadka 13
4.2. Nidaamka Darajeynta 13
4.3. Soo-saaridda Natiijada 13
4.4. Xallinta Cabashooyinka Natiijada 13
5. Cutubka 5aad: Shahaado Bixinta 14
5.1. Caddeynta Natiijo/shahaado 14
5.2. Bixinta Shahaado/Caddeyn Waxbarashada Dalka 14
5.3. Bixin Caddeyn isu-dhiggan 14
5.4. Baddalidda Shahaadada 14

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo
Tacliinta Sare
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة التربية والثقافة والتعليم العالي
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Education, Culture & Higher Education
Office of the Minister

Oraahda Wasiirka

Sida ku cad qodobka 30aad ee Dastuurka ku-meel gaarka ah, waxbarashadu waa xaq asaasi ah oo uu leeyahay muwaaddinka Soomaaliyeed. Xaqaas fulintiisa waxaa u idman Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, oo bixisa adeegyo waxbarasho, oo leh heerar kala geddisan.

Wasaaraddu waxa ay hiigsanaysaa hirgelinta waxbarasho casri ah, leh tayo sare, loona siman yahay, taas oo dabooli karta baahiyaha aqooneed iyo kuwa xirfadeed ee ummadda Soomaaliyeed.

Kadib burburkii hay'adaha dowladda ee dhammaadkii 1991$_{dii}$, waxaa dalka ka hanaqaaday waxbarasho si is-xilqaan ah ay ku billaabeen waaliddiin, macallimiin iyo hay'ado samafal. Dadaalladaas waxaa ka maqnaa oo si weyn baahi loogu qabay nidaam dhexe oo lagu maamulo guud ahaan waxbarashada. Haddaba, si loo horumariyo nidaamkaas, Wasaaraddu waxa ay soo saartay Sharciga Waxbarashada, siyaasado, xeerar iyo habraacyo uu ka mid yahay *Saabkan Imtixaanaadka*.

Saabka Imtixaanaadka oo ah nuqulkii koobaad, si rasmi ahna halkaan loogu soo saaray, waxaa uu noqonayaa dukumenti aasaas u ah mabaadii'da imtixaanaadka iyo shahaadooyinka.

Wasaaradda oo ka jawaabaysa baahida loo qabo helidda Saab guud oo ifinaya mabaadii'da lagu nidaaminayo hawlaha imtixaanaadka qaybahooda kala geddisan, sarena loogu qaadayo tayada iyo kalsoonida imtixaanaadka, ayaa waxaa halkaan lagu meelmariyey Saabka Imtixaanaadka.

25/12

Xil. Inj. Cabdullaahi Abuukar Xaaji.
Wasiirka Wasaaradda,

DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Mahadcelin

Soo saarista Saabkan Guud ee xeerarka iyo habraacyada imtixaanaadka waxa ay ku suurtagashay dadaallada hoggaanka iyo la-taliyeyaasha imtixaanaadka ee kala danbeeyey oo soo gaarsiiyey Saabkaan bar-tilmaameed gaar ah. Nuqulkii ugu horreeyey waxa uu soo baxay Maajo 2018, waxaana dib-u-eegis lagu sameeyey dhammadkii 2019, halkaas oo uu ku soo baxay nuqulkii 2aad. Nuqulka 2aad ayaa lala wadaagay bahwadaagta waxbarashada iyo qaybaha kale ee daneeya imtixaanaadka; waxaana bishii August 2020 soo baxay nuqulkii 3aad oo isugu jiray weero siyaasadeed, xeerar iyo habraacyo loogu talo galay in ay hagaan imtixaanaadka heerarkiisa kala duwan.

Oktober 2021, waxaa la soo saaray nuqulkii 4aad oo ah nuqulka ugu danbeeya ee Saabkan guud oo tilmaamaya mabaadi'da lagu saleynayo xeerarka iyo habraacyada imtixaanaadka waxbarashada dugsiyada; waana midka la rajeynayo in uu tixraac u noqdo hannaanka maamulka imtixaanaadka iyo shahaadooyinka ee waxbarashada dugsiyada.

Mahad gaar ah ayuu Goluhu u celinayaa hoggaanka Wasaaradda iyo la-taliyeyaalka suuragaliyey in la soo saaro Saabkan. Sidaas oo kale, waxa uu u mahad u celinayaa bahwadaagta taageertay soo saarista Saabkan dhinac dhaqaale iyo mid farsamo labadaba.

Erey Bixin

Tax	Eray bixin	Faahfaahin
1	Saab	Waa qaab-dhismeed ka kooban mabaadi'da guud oo tixraaca u ah siyaasadaha, xeerarka iyo habraacyada hawlaha imtixaanaadka
2	Imtixaanaad	Imtixaanaad waxaa loola jeedaa qiimeynta guud ee lagu sameeyo ardayda dhammeysatay heer ka mid ah heerarka la imtixaano ee waxbarashada dugsiyada
3	Cabbiraad	Waa hannaanka aqoonta ardayga loogu caddeeyo iyada oo la adeegsanayo tirooyin.
4	Qiimayn	Hannaanka ururinta, lafaguridda iyo fasiridda macluumaadka la xiriira aqoonta ardayda.
5	Halbeeg	Waa bar laga dhigtay tixraac si loo beego aqoonta ardayda in ay ka sarreyso iyo in kale
6	Karti	Xirfadaha bartuhu ka helay aqoonta, uuna ku qaban karo hawlo gaar ah.
7	Dheellitir	Waa habka la isugu miisaamo suáalaha Imtixaanaadka
8	Natiijo	Waa natiijada kama dambaysta ah ee arday ka gaaray heer waxbarasho

Hordhac

Saabkan waa tixraac loogu talo galay yagleelidda hannaanka waxbarashada dugsiyda dalka oo ku dhisan himilooyinka, hiigsiyada iyo qiyamka Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka. Xafiiska oo ah hay'ad maamul ahaan u madax bannaan, una qaabilsan Dawladda Federaalka Soomaaliya qiimeynta aqoonta ardayda dhammaysa heerarka waxbarashada dugsiyada iyo kuwa u dhigma ee caalamiga ah. Sidaas oo kale, Xafiisku waxa uu dawladda masuul uga yahay bixinta Shahaadada Waxbarashada Dugsiyada (SWD).

Habraacyada iyo xeerarka loo marayo qiimeynta aqoonta ardayda waa in ay waafaqaan Saabkan, oo ah tixraaca asalka ah ee Xafiisku ansixiyey. Hawl-wadeennada imtixaanaadka iyo shahaadooyinku waxaa ay ka heli karaan Saabkan mabaadi'da guud ee jiheynaysa xeerarka iyo habraacyada lagu maamulayo imtixaanaadka. Nuqulkaan waa nuqulkii 1aad ee Saabka Imtixaanaadka waxbarashada dugsiyada.

1. Cutubka 1aad: Ujeeddooyin Guud

1.1. Ujeeddada Saabkaan Guud

Ujeeddada laga leeyahay Saabkan waa dejinta tixraaca siyaasadaha, xeerarka iyo habraacyada maamulka imtixaanaadka waxbarashada dugsiyada dalka. Si gaar ah, Saabkani waxa uu leeyahay ujeeddooyinka ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

1.1.1. Dejinta tixraac mabaadi'da guud ee ay ku dhisan yihiin siyaasadaha, xeerarka iyo habraacyada lagama-maarmaanka u ah maamulka imtixaanaadka dalka ee waxbarashada dugsiyada.

1.1.2. Bixinta shahaado lagu kalsoon yahay oo ku habboon darajada aqoonta imtixaangalaha.

1.1.3. Mideynta xeerarka iyo habraacyada imtixaanaadka dalka (heer federal iyo heer dawlad-goboleed) si looga hortago is-barbar-yaac iyo khaladaad ka dhex-dhaca inta lagu guda jiro geeddi-socodka imtixaanaadka iyo shahaado-bixinta.

1.1.4. Sare-uqaadidda fahamka hawlwadeennada imtixaanaadka ee mabaadi'da tixraaca u ah siyaasadaha iyo habraacyada si loo xoojiyo xirfaddooda.

1.1.5. Sare u qaadidda fahamka Hawlwadeennada ee xuquuqda ardayda iyo waajibaadka saaran ee qiimeynta waxbarashada dugsiyada.

1.2. Baahida Keentay Saabkan

Wixii ka danbeeyey burburkii hay'adaha dawladda ee 1991dii, waxaa dalka ka hanaqaaday waxbarasho ay salka u dhigeen is-xilqaamayaal madaxbannaan, kuwaas oo qabtay hawlo waxbarasho oo aad u ballaaran; waxa ayna dabooleen qayb mug leh oo ka mid ah baahiyaha waxabarshada ardayda. Dadaalladaas waxaa ka maqnaa tixraac mideeya siyaasadaha, xeerararka iyo habraacyada lagama maarmaanka u ah jaangoynta halbeegyada lagu qiimeeyo heerarka kala geddisan ee waxbarashada dugsiyada. Si loo daboolo baahidaas, loona mideeyo dadaallada ay soo bilaabeen is-xilqaamayaashaas, waxaa lagama maarmaan noqotay in la helo saab qotomiya mabaadi'da guud; kuwaas oo laga tixraaci karo siyaasadaha, xeerarka iyo habraacyada imtixaanaadka.

1.3. Diyaarinta Saabkan

Saabkan waxa uu ka dhashay dadaal baaxad leh oo xog looga uruuriyey:

1.3.1. Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (Federaal);
1.3.2. Wasaaradaha Waxbarashada ee Dawlad-Goboleedyada;
1.3.3. Wadatashiyo lala sameeyey daneeyeyaasha waxbarashada dalka;
1.3.4. Wareysiyo laga qaaday aqoonyahanno khibrad u leh arrimaha imtixaanaadka;
1.3.5. Akhris guud oo lagu sameeyey culuumta imtixaanaadka.

Xogihii ka soo baxay dadaalladaas ayaa lagu soo ururiyey nuqulka saabkan oo ah kan ugu danbeeya.

1.4. Hiigsi

Hannaan qiimeyn waxbarsho leh tayo sare, hufnaan iyo isla-xisaabtan loona dhan yahay.

1.5. Himilo

Xaqiijinta hirgalka imtixaanaad ku habboon da'da iyo aqoonta ardayda dhammaysa heerarka waxbarashada dugsiyada dalka, laguna bixiyo shahaado u dhiganta aqoontooda.

1.6. Qiyam

Saab ku dhisan tayo sare, hufnaan, daah-furnaan, xilkasnimo iyo isla xisaabtan.

1.7. Mabaadi' Guud

Saabkan waxa uu tilmaamayaa ilaalinta mabaadi'da guud marka la dejinayo ama wax laga baddalayo siyaasadaha, xeerarka iyo habraacyada qiimeynta waxbarashada. Mabaadi'daas waxaa ka mid ah:

1.7.1. Ardayda dhammeysa waxbarashada heerarka la qiimeeyo waa in ay helaan imtixaanaad lagu qiimeeyo aqoontooda.

1.7.2. Imtixaanaadka iyo shahaadooyinku waa in ay noqdaan kuwo ay u dhanyihiin ardayda xaqa u leh.

1.7.3. Ardayda baahiyaha gaarka ah leh waxaa ay leeyihiin xuquuqda kuwa kale; waana in laga qaybgeliyaa imtixaanaadka iyo shahaado bixinta.

1.8. Sharcinimada Sameynta Saabka

Saabkan qiimeynta waxbarashada waa qoraal sharci ah oo waafaqsan Sharciga Waxbarashada (2017) cutubka 9aad, qodobka 50aad kaas oo u qoran sidan: -

> *"Wasaaradda ayaa ka mas'uul ah qiimeynta Waxbarashada dalka heerarkeeda koowaad (Hoose/Dhexe), labaad (dugsi sare) iyo Sedexaad (jaamacad) (Mid Dawladeed iyo mid gaar loo leeyahayba) iyo sharci-siinta macallimiinta."*

Sidaas oo kale, qodobka 51aad iyo 52aad ee isla sharcigaas waxa ay qeexayaan qiimaynta tayada iyo maamulka waxbarashada sanadlaha ah, kuwaas oo u qoran sidan:-

> *"Sannad dugsiyeed kasta waa in ardayda Waxbarashadooda la qiimeeyaa ugu yaraan labo jeer, la diiwaan geliyaa, la keydiyaa, lana ogeysiiyaa ardayda iyo waalidkoodba natiijada qiimaynta."*

> *"Arday kasta oo dhammeysta labada heer ee Waxbarasho (Hoose-Dhexe iyo Dugsiga sare), waa in uu u fariistaa Imtixaanaadka shahaadiga ah ee Dawladda."*

Sidaasi awgeed, Saabka qiimeynta aqoonta ardayda ee waxbarashada dugsiyada waa mid sharci ah oo aan laga tallaabi karin.

1.9. Saamayn

Saabkani waxa uu saamaynayaa dhammaan siyaasadaha, xeerarka iyo habraacyada loo dejiyey maamulka qiimeynta waxbarashada dugsiyada.

1.10. U-Dhammaan

Siyaasadaha iyo habraacyada loo dejinayo qiimeynta aqoonta ardayda waxa ay ku dhisan yihiin wadajirka dhammaan ardayda wax ka barata dalka Soomaaliya oo aan loo kala soocin sinaba. Siyaasadaha, xeerarka iyo habraacyada waa in hadafkoodu ku koobnaado qiimeynta aqoonta ardayda ee waxbarashada dugsiyada, qiilna aan looga dhigan reebidda arday gudbi lahaa. Arrimahan waxaa faahfaahinaya *Xeerka U-Dhammaanta Ardayda.*

2. Cutubka 2aad: Taabba-gelinta Imtixaanaadka

2.1. Ammaano iyo Hufnaan

Ammaanadu waa qodobka ugu muhimsan marka laga hadlayo kalsoonida imtixaanaadka; waana udub-dhexaadka imtixaanaadku ku tiirsan yihiin, la'aanteedna aysan ansax noqoneyn. Dadaalka maskaxeed iyo kan maaliyadeed ee la geliyo imtixaanaad aan lahayn ammaano waxa ay noqon karaan "hal bacaad lagu lisay". Si loo sugo ammaanada iyo hufnaanta imtixaanaadka, waa in la dhaqangeliyaa *Xeerka Ammaanada Imtixaanaadka.*

2.2. Miisaaniyadda Imtixaanaadka

Imtixaanaadka Qaran waa in loo helaa miisaaniyad ku filan. Miisaaniyadda waa in la dhabiilaa, loona maamula si hufan. Ilaalinta iyo isla xisaabtanka miisaaniyadda waxaa faahfaahinaya *Xeerka Maamulka iyo Miisaaniyadda.*

2.3. Qiimayn aqoonta ardayga

Arday kasta oo dhammaysta heerarka waxbarashada ee dugsiyada waxaa waajib ah in loo qiimeeyo aqoontiisa. Qiimeyntaas waxaa la samayn karaa ugu yaraan hal mar sanadkii oo uu qorshaynteeda leeyahay Xafiiska Imtixaanaadku. Qiimeynta waxbarashada dugsiyada waxaa laga qaadi karaa arday dhammaystay fasalka 8aad iyo 12aad, oo aan da'diisu ka yareyn 13 iyo 17 sano sida ay u kala horreeyaan.

Qiimaynta imtixaanaadku waxa ay ku koobantahay maaddoyin la isla ogyahay, kuna jira manhajka. Sidaas oo kale, qiimeyntu waa in ay ku timaaddaa siiqada waxbaridda iyo nooca qiimeyn ee manhajku tusaaleynayo. Xeerka Qiimeynta ayaa faahfaahinaya shuruudaha qiimeynta aqoonta ardayda.

2.4. Diiwaangelinta ardayda

Ardayda dhammaysata waxbarashada heerarka dugsiyada waa in loo diiwaan geliyaa ka qayb-galka imtixaanaadka. Sidaas oo kale, xogta ardayda loo diiwaan gelinayo imtixaanaadka waxa ay ka imaanaysaa nidaamka xogaha waxbarashada Qaranka (EMIS). Habka diiwaangelinta ardayda galeysa imtixaanaadka waxaa loo marayaa *Xeerka Diiwaangelinta ardayda.*

2.5. Xarun Imtixaan

Xarumaha lagu qaadayo imtixaanaadka waa xarumo u haya ummadda hawl qaran oo mug leh, sanad walbana loo baahan yahay. Dhammaan xarumaha waxbarasho ee ummaddu leedahay waa xarumo imtixaan haddii loo baahdo. Xarumaha waxbarasho ee gaarka loo leeyahay waxaa

ay noqon karaan xarumo imtixaan *haddii loo baahdo,* isla markaasna maamulka xarumuhu ay oggolaadaan. Qaabka xulashada xarumaha waxaa dejinaya *Xeerka Xarumaha Imtixaanaadka*.

2.6. Jadwallada Madalaysan

Imtixaanaadku waxa ay ku dhacayaan jadwallo xaddidan oo loogu talo galay.

Xafiiska imtixaanaadka ayaa go'aaminaya tirada imtixaanaadka ee maaddo kasta yeelanayso. Sidaas oo kale, Xafiiska ayaa go'aaminaya ugu yaraan iyo ugu badnaan inta maaddo oo arday imtixaan ugu fariisan karo. Dhinaca kale, imtixaanaadku waa in ay ku idlaadaan ugu badnaan 2 usbuuc gudohood xilli-imtixaaneedkiiba.

Jadwalka imtixaanaadku waxaa uu saameeyaa dhammaan bahwadaagta waxbarashada sida dawlad goboleedyada, maamullada dugsiyada, ardayda iyo waalidiinta. Waa masuuliyadda Xafiiska in uu shaaciyo jadwalka Imtixaanaadka waqti ku filan si uu u gaaro cid walba oo imtixaanaadku saameeyaan. Faahfaahinta u gaarka ah jadwalka imtixaanaadka waxa hagaya *xeerka jadwalka imtixaanaadka*.

3. Cutubka 3aad: Maamulidda & Qaadista Imtixaanaadka

3.1. Amniga Imtixaanaadka

Sugnaanta amnigu waxa ay ka mid tahay qaybaha ugu muhiimsan hawlaha imtixaanaadka. Imtixaanaad la dusiyo laguma kalsoonaan karo. Si loo sugo amniga imtixaanaadka, waa in la raaco *Xeerka amniga imtixaanaadka*. Xeerkaas ayaa faahfaahinaya sida loo sugayo amniga imtixaanaadka.

3.2. Dejinta Imtixaanka

Imtixaanaadku waxa ay cabbiraan heerka aqooneed ee arday uu ka gaaray maaddo ka mid ah manhajka waxbarashada qaranka. Si loo helo qiimeyn sax ah, waa in la dejiyaa imtixaanaad ku habboon cabbirka tayada iyo heerka aqooneed ee ardaydu ka gaareen waxbarashada dugsiyada. Imtixaanaadka waa in lagu dejiyo luqadaha muqarrarka lagu diyaariyey. Habka Dejinta su'aalaha imtixaanaadka waxaa loo marayaa *Xeerka Dejinta Imtixaanaadka.*

3.3. Daabicidda Imtixaanka

Daabacaadda waa qayb ka tirsan diyaarinta imtixaanaadka. Imtixaanaadka la daabacayo waa in ay daboolaan baahiyaha kala duwan ee imtixaan-galayaasha. Daabicidda waxaa loo marayaa si waafaqsan *Xeerka Daabicidda Imtixaanaadka.*

3.4. Keydinta Imtixaanaadka

Imtixaanka nuqulladiisa kala duwan (elektaroonig ama daabacan), waa in si adag loo xifdiyo, oo aan sinnaba lagu dusin karin. Xeerka Amniga Imtixaanaadka ayaa faahfaahinaya sida loo keydinayo nuqullada imtixanaadka.

3.5. Daabulista Imtixaanaadka

Si loo qaado imtixaanaadka, waa in la gaarsiiyaa xarumaha imtixaanaadka ee degmooyinka iyo gobollada dalka. Taasi waxa ay sababaysaa in imtixaanaadka laga daabulo keydka dhexe loona daabbulo xarumaha. Waa in la xaqiijiyaa sugnaanta amniga imtixaanaadka marka la daabbulayo. Daabulidda imtixaanaadka waxaa faahfaahinaya Xeerka Daabulidda.

3.6. Qaadista Imtixaanka

Arday kasta oo si sharci ah uga qayb galaya imtixaanaadka waxa uu xaq u leeyahay in uu helo nuqullada imtixaanaadka ee maadooyinka loo diiwaan geliyey isla markaasna uu soo bartay marka la qaadayo. Imtixaanaadka waxaa lagu qaadi karaa oo keli ah xarun imtixaan oo Goluhu ansixiyey. Qiimeynta waxaa laga qaadi karaa ardayda si buuxda u

dhammeysatay heer ka mid ah heerarka waxbarashada la qiimeeyo. Imtixaan maaddo ka mid ah imtixaanaadka waxaa la gali karaa hal waqti dalka oo dhan si waafaqsan jadwalka rasmiga ah. Hawlaha qaadista imtixaanaadka waxaa lagu faahfaahin doonaa *Xeerka Qaadista Imtixaanaadka*.

3.7. Anshaxa Imtixaanaadka

Anshaxu waxa uu gundhig u yahay ansax ahaanshaha imtixaanaadka. Dhammaan imtixaan-galayaasha iyo hawl-wadeennada ka shaqaynaya imtixaanaadka waa in ay dhowraan Anshaxa Imtixaanaadka, si waafaqsan *Xeerka Anshaxa Imtixaanaadka*. Qof kasta oo jabiya *anshaxa imtixaanaadka* waxaa la marinayaa ciqaabaha ku xusan Xeerka anshaxa imtixaanaadka.

4. Cutubka 4aad: Sixidda Imtixaanaadka

4.1. Sixidda Imtixaanaadka

Hannaanka sixidda imtixaanaadku waa mid leh saamayn weyn laguna dhiso go'aanno wax-ku-ool ah. Habka sixiddu waa in ay u dhacdaa sida ugu heerka sarreysa oo lagu qabi karo kalsoonida ugu weyn. Si taasi u dhacdo, waa in la raacaa *Xeerka sixidda imtixaanaadka*.

4.2. Nidaamka Darajeynta

Sixidda imtixaanaadka kadib, waxaa la dajinayaa nidaamka darajeynta dhibcaha. Dheellitirka darajooyinka ee dhibcaha muhiimka ah waxaa go'aaminaya khubaro uu Xafiisku magacaabo. Arrimaha kor ku xusan waxaa loo marayaa *Xeerka Darajeynta*.

4.3. Soo-saaridda Natiijada

Imtixaangale kasta waxa uu xaq u leeyahay in natiijada imtixaanaadkiisa loo soo saaro, laguna gaarsiiyo si hufan. Soo saarista natiijada waxaa ka dhalan kara saamayn amni, mid bulsho, mid siyaasadeed iyo mid caafimaad. Si loo maareeyo culeysyada imaan kara, waa in natiijada la shaacinayo laga galo tashi ballaaran oo u dhexeeya farsamayaqaannada imtixaanaadka iyo hoggaanka sare ee Xafiiska/Wasaaradda; lagana soo saaro go'aan rasmi ah oo waafaqsan *Xeerka shaacinta natiijada*.

4.4. Xallinta Cabashooyinka Natiijada

Ardayda ka qayb gashay imtixaanaadka heerarkooda kala duwan waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan natiijooyin rasmi ah. Xafiiska imtixaanaadku waxa uu xaq u leeyahay in uu la noqdo ama wax ka baddalo natiijooyinka la shaaciyey si waafaqsan *xeerka shaacinta natiijooyinka*. Imtixaan-galeyaashu xaq ayey u leeyihiin in ay cabasho ka soo gudbiyaan natiijo haddii ay ku qanci waayaan. Si loo maareeyo cabashooyinka ardayda ee natiijada imtixaanaadka, waa in la raacaa *Xeerka xallinta cabashooyinka*.

5. Cutubka 5aad: Shahaado Bixinta

5.1. Caddeynta Natiijo/shahaado

Arday waliba oo ka qayb galay imtixaanaadka fasallada 8aad iyo 12aad waxa uu xaq u leeyahay in loo sugo natiijada imtixaankiisa ama shahaadada la siiyey. Xafiisku waxa uu sameeyey mareeg (soneb.gov.so) laga hubsan karo sugnaanta natiijooyinka iyo shahaadooyinka uu bixiyo. Dhammaan hubin natiijo ama shahaado waa in laga helaa mareegtaas. Habraac gaar ah ayaa faahfaahinaya sida loo adeegsanayo mareegtaas.

5.2. Bixinta Shahaado/Caddeyn Waxbarashada Dalka

Shahaadada imtixaanaadka waxbarashada dugsiyadu waa hanti uu leeyahay Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka. Arday kasta oo dhammeystay kuna gudbay heer ka mid ah heerarka waxbarashada dugsiyada dalka ayaa codsan kara shahaado. Sidaas oo kale, ardayga aan ku gudbin heer ka mid ah heerarka imtixaanaadka, waxaa uu xaq u leeyahay in uu codsado nuqul caddeyneed rasmi ah. Bixinta shahaadada waxbarashada dugsiyada waxaa loo marayaa *Xeerka bixinta shahaadada.*

5.3. Bixin Caddeyn isu-dhiggan

Ardayda wax ku baratay manhaj kale (dalka gudihiisa ama dibaddiisa) ee doonaya in loo tixgeliyo shahaado aan ahayn midda Qaranka, waxaa ay codsan karaan caddeyn isu-dhigan. Caddeynta isu-dhiganka waxbarasho dal kale waxaa loo marayaa *Xeerka Isu-Dhiganka Shahaadooyinka.*

5.4. Baddalidda Shahaadada

Arday waliba oo doonaya in loo baddalo shahaado luntay ama cilladowday waxa uu xaq u leeyahay in loo baddalo. Nidaamka loogu baddalayo waxaa go'aaminaya Xeerka Baddalidda Shahaadada.